# WARGELINTA QAWAANIINTA DARYEELKA
## *XUQUUQDA WAALIDKA EE WAXBARASHADA GAARKA AH*

Nofembar 2002

### HORUDHAC

Buugaan yar wuxu ku siinayaa haddii aad tahay Waalid dhalay ilmo waxbarashada ku adagtahay (disability), aragti guud ee xuquuqda waxbarashada, maraka qaar lagu magacaabo Qawaaniinta Daryeelka. Qawaaniinta daryeelka waxa kale oo heli kara ardeyda curyaamiinta ah ee jira 18 sano ee loo arko inuu go'aankiisa asaga gaari karayo. **Wargelintani Qawaaniinta Daryeelka** waa in lagu siiya markii aad waydiisato mig laga guuriyey. Sidaa oo kale waa in lagu siiya:

1. Marka ugu horeysa ee cunugaaga loo diro qiimeynta waxbarashada gaarka ah;
2. Waqti walba oo kulan sanadeedka barnaamijka waxbarashada shaqsi ahaaneed "individual education program (IEP)", qorshaha so dhexgelidda ka dhexeysa hayadaha (IIP) Qorshaha sanadeedka adeega qoyska gaar ahaaneed "annual individual family service plan (IFSP)" oo cunugaaga loo qoondeeyey kulan;
3. Waqti walba oo cunugaag dib loo qiimeynayo;
4. Haddaad codsatid waqtiga (dacwada) la dhageysan doono;
5. Hadduu cunugaaga dugsiga laga eryo in ka badan (10) cisho oo is xigta; ama,
6. Haddii dugsigu cunugaaga geeyo waxbarsho ku meel gaar ah ilaa mudo dhan 45 cisho ah asaga oo la yimid dhibaato la xiriirta (isticmaal) daroogo iyo wax la xiriira hub.

### QORAAL OGEYSIIN AH EE HORE

Degmadu waa inay horey kuu siisaa qoraal ogeysiin ah waqti walba oo la gudoonsado in la bilaabo ama wax laga baddalo, ama la diido in la bilaabo ama wax laga badalo aqoonsiga iyo qiimeynta ama meeleynta waxbarashada cunugaaga.

Ogeysiiska Qoraalka ah waa iney ku jiraan:

1. Nooca falka la soo gudbiyey ama la diiday;
2. Sharaxaad sababta degmada u soo jeedisay ama ay u diiday in ay wax ka qabato;
3. Sharaxaad wixii talo kale ah ee dugsiga uu tixgelinayo iyo sababta waxa talooyinka loo diiday;
4. Sharaxaada nidaamka qiimeynta, imtixaanka,diiwaanada ama warbixinada dugsiga u isticmaalo sabab ahaan soo jeedintiisa ama diidmadiisaba;
5. Wixii sharaaxaad kala ah ee la xiriira xaqiiqada dugsigu u soo jeediyey ama uu u diiday;
6. Warbixin ku saabsan in cunugaaga qawaaniinta daryeelka ilaalinayo iyo macluumaadlka ku saabsan in aad heshid nuqul warqadani ah; iyo,
7. Ilo (Sources) aad la xiriirto oo kaa kaalmeeya fahamka Qawaaniinta daryeelka.

### MACLUUMAAD DHEERI AH

Haddaad rabtid in lagaa caawiyo si aad ku fahamtid midkastoo ka mid nidaamyada xaquuqdaada ama waxkastoo ku saabsan waxbarashada cunugaaga, fadlan la soo xariir maamulaha, maamulaha waxbarashada gaarka ah, ama qofka magaciisa uu hoos ku qoranyahay. Ogeysiiskaan waa in laguugu soo diro afkaaga hooyo ama qaab kaloo wargelin ee aad aqoon u leedahay.

Haddaad su'aalo kale ka qabtid amaba aad u baahantahay in maclumaad dheraad laguu soo diro, fadlan la soo xariir:

Magaca _____

Telefoon _____

Maclumaad dheraad waxaad ku heli kartaa, adigoo la soo xariira mid ka mid ah ururadaan:

ARC Minnesota (u doodidda dadka qaabka itaaldarrida koriimada):
651-523-0823, 1-800-582-5256

Family Service Inc., Learning Disability Program (Adeegyada Qoysaska, Barnaamijka Itaaldarrida Waxbarashada):
651-222-0311, 1-800-982-2303,
651-222-0175 (TTY)

MN Association for Children Mental Health (MN Iskaashiga Caafimaadka Ubadka Madaxa Dhiman):
651-644-7333, 1-800-528-4511

MN Brain Injury Association (MN Iskaashiga Dhaawaca Madaxa Gaara):
612-378-2742, 1-800-444-6443

MN Department of Children, Families & Learning (MN Waaxda Ubadka, Qoysaska & Waxbarashada):
651-582-8689, 651-582-8201 (TTY)

MN Disability Law Center (MN Xarunta Sharciga Itaaldarrida):
612-332-1441, 1-800-292-4150,
612-332-4668 (TTY)
MN Special Education Mediation Service (MN Adeegyada Dhedhexaadinta Waxbarashada Gaarka ah):
1-866-466-7367, 1-800-627-3529 (TTY)
651-582-8222
PACER (Xulafada Waalidka U Dooda Xuquuqda Waxbarashada):
952-838-9000, 1-800-53-PACER,
952-838-0190 (TTY)

## OGOLAANSHAHA WAALIDKA

Dugsigu waa inuu heystaa **ogolaanshaaga qoraalka ah** inta uusan bilaabin qiimeynta hore ee cunugaaga, iyo inta uusan bilaabin bixinta ugu horreysa ee waxbarashada gaarka ah oo la xiiriirta adeegyada cunugaaga. Siinta ogolaansho bilowga qiimeynta taa micnaheeda ma ahan inaad u ogolaatay meeleeynta hore.

Dugsigu wuxuu ku dhaqaaqi karaa dib u qiimeyn xita haddusan kaa haysan ogolaanshahaaga, laakin waa inuu soo caaddeyo inuu qaaday tillaboyin macquul ah oo lagu raadinayey ogolaanshahaaga qoraalka ah. Kaddib markuu muujiya dadaal macquul sidii lagu heli lahaa ogolaanshahaaga, dugsigu wuxuu ku dhaqaaqi karaa dib u qiimeynta la soo jeediyey waa haddaadan muddo gaaraysa 14 cisho gudeheeda aadan ku soo gudbin qoraal diidmo ah.

Waxaad xaq u leedahay **inaad qoraal ku diidid** tillaaba kasta oo uu dugsigu soo jeediyo. Kaddib markuu helo qoraalkaaga diidmada ah, dugsigu wuxuu kaa codsani inaad ka soo qeybgashid shir la tashi ah, dhexdhexaadin, ama waxyaabo kaloo keenaya in waxuun la isku afgarto laguna xalliyo qilaafka.

Haddaad diidid adeegyada ama qiimeynta la soo jeediyey, dusigu marna cunugaaga uma uu diidayo adeegyada ama hawlaha kale. Dugsigu waa inuu sii wado bixinta waxbarasho ku habboon cunugaaga.

Haddaad qoraal wax ku diido, dugsigu ma u qiimen karo cunugaaga isaagoon adiga ka haysan ogolaansho ama fasax ka haysan awooda sarkaalka dhegeysiga. Dugsigu wuxuu hawshiisa sii wadi karaa haddaad adigu si **qoraal ah** aad ugu guuldarresatid.

## QORAALKA OGEYSIISKA SANADEED EE BARNAAMIJKA WAXBARASHADA SHAQSI AHAANEED (IEP) EE LA XARIIRA DIB U CELINTA LACAGTA ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Degmadu waa iney qoraal sanadeedka kugula socodsiisa ogeysiiska ku saabsan:

1. Iney damacsantahay iney lacag dib u celin ka hesho gargaarka caafimaadka ama MinnesotaCare ee ku saabsan IEP ee la xariira adeegyada caafimaadka oo ay degmadu bixisay;
2. Xaqaaga aad ku codsan kartid nuqulka xogta ku saabsan IEP ee ka xariira adeegyada ay degmadu shaaca ka u qaadday qeykaloo arrinta ay saameyso; iyo
3. Xaqaaga aad u leedahay inaad kaga noqon kartid ogolaanshaha sii deynta xogta cunugaaga mar alla marka aad rabtid ayadoon aysan waxba kaa soo raaceyn.

Degmadu way kaa codsan kartaa laakin madaxa kamaa saari karto in camiyskaaga la isticmaalo si aad uga caawisid bixinta qarashka adeegyada.

## QIIMEYN WAXBARASHO XOR AH

Qiimeynta waxbarashada xorta ah (IEE) waa qiimeyn ay bixyaan dad (qof) ku taqasusey qiimeynta oo aan aheyn shaqaalaha degmadaada. Waxaad weydiisan kartaa kuwaa bixiya qiimeynta waxbarashada xorta ah dugsigana qarashka dhiibo haddaad isku afgaran weydaan kuwa dugsiga wax u qiimeeya. Sarkaalka (dacwadda) dhageysta ayaa helaya dacwadda cunugaaga qiimeyntiisa isaga oo ka madaxbanaan tan dugsiga, dusgiga cunugaagu dhigtana ayaa bixinaya qarashka ku baxa inta dacwadda dhageysigeeda ay socoto.

Kaddib markaad codsatid qiimeyn waxbarasho xor ah (IEE), dugsigu waa inuu ku siiyo wargelin ku saabsan waxa ku saleysan doorashada qiimeyn xor ah iyo wargelinta ku saabsan meesha laga heli karo qiimeyaha xorta ah.

Hadduusan dugsigu rumeysanyahay inaan qiimeyn xor ah (IEE) loo baahneyn, markaasi dugsigu waa inuu sarkaalka dhegeysiga uu ka codsadaa tillabada ku habbon ee la xariirta qiimeynta. Hadduu sarkaalka dhegeysiga uu soo go'aamiyo in qeimeynta dugsigu uu yahahay midka saxa ah, waxaad weli xaq u leedahay

inaad heshid qiimeyn xor ah, laakin ma ahaandoono mid uu dugsigu kaa bixin doono.

Haddaad heshid qiimeyn xor ah (IEE), natiijada ka soo baxda qiimeyntaasu waa iney ahaata mid qaddarin ka haysata xubnaha IEP/IIIP/IFSP waxaana loo soo bandhigi in lagu marqaati furo dhegeysiga dacwadda ku saabsam cunugaaga.

## DIIWAANADA XOGTA WAXBARASHADA

Awood u helidda isticmaalka Xogta
Haddii aad doonto in aad aragtid xogta cunugaaga, weydii maamulaha inuu ku siiyo awood aad dib ugu eegi karti xogta qaarkeed ee aad adigu rabtid inaad dib u eegtid. Xogtaan waxaa ka mid ah dhammaan macluumaadka ee loo soo aruurshay, xasilin, ama shaqaalaha u isticmaalaan aqoonsi. Dugsigu waa inuu kuu ogolaadaa inaad fiirisid xogtaan ayada oo aan waxba dib kuu dhigin, iyo inta ko horeysa kulanka IEP/IIIP/IFSP ama dhageysiga (dacwadda) cunugaaga. Dugsigu wuxuu haystaa inuu kuugu soo jawaabo codsigaaga shan (5) cisho oo la shaqeeyo.

Waxaad xaq u leedahay inaad baartid xog ay ka mid tahay xaqa ah:
1. Markaan codsatid laguu sharraxo ama laguu micneyo waxa ku saabsan xogta cunugaaga:
2. Fursad u yeelatid qof aad adigu dooratay inuu kuu baaro ama kuu eego xogta; iyo,
3. Weydii dugsiga inuu ku siiyo nuqulada diiwaanka waxbarashada cunugaaga. Waxaa laga yaaba inaad inaad bixisid ujrada la xariira nuqulka.

Diiwaanada Xogta la Heli karo
Degma/dugsigu waa iney diwaangeliyaan cid kasta, oo aan ahayn shaqaalah sharciga u leh, oo eegay diwaanka xogta waxbarashada cunugaaga. Diiwaangelinta kuwa xogtaan eegay inuu ku jira magaca qofka, taariiqda ay uu asaga/ayda ay egeen xogta, iyo ujeedada loo eegay xogta.

Ogolaanshaha Sii deynta Xogta Diiwaanka
Waa in la haystaa ogolaanshaha waalidka inta aan la sii deyn xogta tilmaameysa shaqsiga la diwaangeliye, macluudmaadkna ay isticmaalan dad ama hayado aan lo fasaxin. Dugsiyadu marna hayadaha caafimaadka uma sii deyn karaan maclumaad iyagoon waalidka ka haysan ogolaansho.

Lacagta ku saabsan Xogta Baadigoobka, Xog Guuris, Nuqul sameynta Xogta
Degamada/Dugsigu wax lacag ah kaama ay qaadeyso baadigoobka iyo guurista xogta, laakiin waxey kaa qaadeysa ujra yar marka aad nuqulka xogata sameyneysid, waa haddaadan awood u yeelan inaad iska bixisid ujrada.

Codsiga Waalidka ee ku saabsan Wax ka Bedelidda Xogta Diiwaanka:
1. Degmadu waa iney kugu wargeliso nooca uu yahay maclumaadka iyo meesha laga helo diiwaanka xogta ee cunugaaga.

2. haddey kula tahay in maclumaadka ku taxluuqa xogta cunugaaga uusan sax ahayn, qaldan yahay, amaba uu wax u dhimayo xaqa qarsoodinta ee uu cunugaaga leeyahay, markaasi waxaad qoraal ku codsan kartaa iney degmadu wax ka beddesho ama ka bixiso maclumaadka xogta. Deagmadu waa iney go'aan ka gaartaa haddey wax ka beddeleyso macluumaadka xogta. Haddey degmadu go'aan ku gaarto ineysan waxba ka beddeleynin, degmadu waa iney go'aankaasi qoraal kugu soo wargelisaa inaad adigu xaq leedahay inaadan ogolaan go'aanka ady degmadu gaartay. Sarkaalka dhegeysiga ayaa go'aan ka gaaraya hadduu macluumaadka yahay mid saxan.

Burburinta Xogta Diiwaanka
Inta aysan degmadu burburinin wixii macluumaad ee ku taxluuqa waxbarashada cunugaaga, waa iney tillaabadaa kugu soo wargelisaa. Laakiin, dugsigu wuxaa marwalba kayd u ahaan doona maclumaad joogta ah ee cunugaaga kuwaas oo ay ka midyihiin: magaca, cinwaanka,telefoon nambarka, shahaadada darajadeed iyo fasalada.

## DHEXDHEXAADIN

Dhexdhexaadintu waa hab iskaa ah. Adiga iyo degmadu waxaad dhexdhexaadin ka codsan kartaan qeybta adeegyada dhexdhexaadinta waxbarashada gaarka ah ee Minnesota (Minnesota Special Education Mediation Service-MNSEMS) marka la waco 651-582-8222 ama 1-866-466-7367. Dhexdhexaadinta waxaa la kaashada waaya aragnimada xirdayaqaan aan dhannna raacsaneyn. Dhexdhexaadintu ma ahaaneyso mid laguugu diidayo xaqaaga ama in dib loo dhigo xaqaaga aad u leedahay dacwad dhegeysi leh. Labada dhinacba adiga iyo shaqaalaha degmadu waa inaad raali ka noqotaan dhexdhexaadin inta aan la idiin magacaabin dhexdhexaadiye. Intey dhexdheaxaadintu socoto adiga ama degmadu waad ka bixi kartaan hawlaha dhexdhexaadinta.

## CABASHO QORAAL AH

Hay'ad ama shaqsi waliba wuxuu cabasho u soo gudbin karaa Waaxda Ubadka, Qoysaska iyo Waxbarashad ee Minnesota (Minnesota Department of Children, Families & Learning –CFL). Cabashada loo soo diro waaxda CFL waa iney ahaadaan:

1. Kuwo **qoraal ah** lehna saxiixa qofka ama hayadaha so qorayso cabashada;
2. Xadgudubka federaaliga ama goboleed ee waxbarashada gaarka ee loo maleeyo inuu dhacay intii u dhexeysay sanadka la soo dhaafay ama intaa ka dheer hadduu xadgudubku yahay mid socota ah;
3. Sheegtid waxa dhabta ah ee salka u ah xadgudubka loo maleeyo inuu dhacay; iyo
4. Soo raacisid magaca, cinwaanka, iyo telefoon nambarka shaqsiga ama hay'adda soo gudbineyso cabashada.

Cabashada waa in loo soo diraa:

Minnesota Department of Children,
Families & Learning
Division of Accountability and Compliance
Complaint System Supervisor
1500 West Highway 36
Roseville, MN 55113-4266
651.582.8689 Telefoon 651.582.8725 Fax

CFL 60 cisho gudeheeda ku soo direysaa go'aanka oo qoraal ah.

## NIDAAMKA DHEGEYSIGA OO EEX LA'AAN AH

Labadiinaba adiga iyo degmadu waxaad xaq u leedihiin inaad **qoraal ahaan** aad ku coodsataan nidaamka dhegeysiga eex laa'aanta ah. Dhegeysiga eex la'anta ah wuxuu wax ka qabanayaa arrimo kasto la xariira aqoonsinga, qiimeynta, meeleynta waxbarashada, ama qodobada sharciga ah ee ku taxluuqa waxbarasho guud oo xor ah.

Haddaad si qoraal ah aad ku codsatid dhegeysi, degmadu waa iney kuu sheegtaa iney jiraan adeegyo dhexdhexaadin ah. Degmadu waa kuu diyaarisaa wargelin kasta oo ku saabsan sidaad ku heli lahayd gargaar adeegyada sharciga oo jaban ama bilaash ah ee laga helo meesha aad deggantahay.

<u>Habka Bilowga Dhegeysiga Dacwadda</u>
Kaddib markaad si qoraal uga codsatay degmadu inuu dhegeysi dhaco, degmadu waa iney ku siisa nuqul ay ku qoranatahay xuquuqdaada. **Cogsigaaga qoraalka ah** waa inuu lahaadaa:

1. Magaca cunugaaga;
2. Cinwaanka cunugaaga;
3. Magaca dugsiga uu cunugaaga aado;
4. Warbixin dhibaatada (dhibaatoyinka) oo ku taxluuqda ra'yiga la soo jeediyey ama wax diidista hore ama beddelista waxbarashad gaarka ama adeegyada la xariira, oo ay ka midyihiin xaqiiqoyin badan ee suurtogalka ah, iyo
5. Soo jeedinta sidii lagu xallin laha dhibaatada oo tixgelineysaa sida aad wax uga warqabtey waqtigaa.

Degmada/dugsiga masuulka ka waxbarashada gaarka ee cunugaaga waa iney soo diyaariso siduu dhegeysgu uu dhici lahaa. Xuquuyada hoos ku xusan waa tusmo gaaban oo aan ahayn tusmada guud ee shegeysa siduu dhegeysiga uu u dhacayo.

Adiga iyo degmadu, labadiinaba waxaad inta uu dhegeysiga socdo leedihiin xuquuqyo, kuwaas oo ay ka midyihiin:

1. Bayaan qoraal ah oo ka hadlaya waxyaabaha qaaska ah ee diidmada ka imaaneysa qeybaha ka qeybgalaya codsaday dhegeysiga;
2. Jawaab qoraal oo shan cisho gudaheeda lagu diidayo kaddib marki diidmo laga helo dhinaca kale;
3. Uu kula socdo kulana taliyo qareen iyo dad qibrado qaas ama tababar ka haysta waxyaabaha ku taxluuqa dhibaatoyinka ubadka qaba itaal darro;
4. Soo bandhigtid caddayn aadna kahortagtid, wax ka sheegtid marqaatida qeybta kale, aadna ku dhirrigelisid iney marqaatiyad oo idil imaadaan dhegeysiga;
5. Inaana dhegeysiga lagu ogolaan caddayn nooc kasta ah oo aan shan cisho gudeheeda lagu wargelin qeybta kale ee dacwada ka tirsan; ay ka midyihiin qiimeyn maclumaadka iyo taloosin salkeedu yahay isla maclumaadkaas; iyo
6. In qoraal lalgu helo, haddaad sidaa ku rabtid, hab eletronik , mid hadalka cajalad lagu duubay iyo aqbaarta ku saabsan caddeynta iyo go'aanka, oo aad bilaash lagugu siinayo.

Adiga, waxaad si qaas xaq ugu leedahay inaad:

1. Uu cunugaaga oo dacwaddisu mesha lagu qabanayo, goobjoog ka ahaado intuu dhegeysiga socdo;, iyo

2. Dhegeysigu ahaado mid dadka u furan.

Go'aanka dhegeysiga lagu gaaro waa mid kama dambeys ah haddaanan si racfaan ah dhegeysi kale lagu codsan.

Sii deynta Caddeyn Dheeraad inta Uusan Dhegeysigu Dhicin
Qiyaastii shan (5) cisho kahor inta aan dhegeysiga la qaban, adiga iyo degmadu waa iney qola waliba qolada u gudbisaa dhammaan wixii qiimeyn oo ku saabsan cunugaaga oo lagu soo dhammeyey taariiqdaas iy talooyin ku salka ku haysa qiimeyntaas ee lagu talo jiro in dhegeysiga la keeno. Sarkaalka dhegeysiga ayaan ogolaan doonin in dhegeysiga la keeno wixii qiimeyn ah ama talosiin ah ayadoon aan ogolaansho laga haysan dhinaca kale. Dhammaan wixii caddeyn waa iney ku koobnaadaan arrimaha qaaska ah ee uu sarkaalka dhegeysiga soo sharraxay.

Habka Maamulidda Dhegeysiga Rafcaanka ah
Haddaad go'aan ku gaartid inaad rafcaan ka codsatid go'aanka uu gaaray sarkaalka dhegeysiga, rafcaanku waa **in si qoraal ah** loogu dalbado loona diraa CFL 30 cisho kaddib markaad heshid rasiidka go'aanka oo qoraal ah. Dabcan ogeysiiska rafcaanka waa inaad u soo dirtaa degmada. Wixii intaa ka dambeysa CFL waxey magacaabeysaa sarkaal dhegeysi dib u eega kaas oo 30 cisho gadaheeda ee ka dambeya maalinta maalinta la soo diray codsiga rafcaanka, waa haddeysan asaga ama ayada ay fidisay codsi waqti dheeraad oo ka yimid labada dhinac midkood.

## DACWO QAADISTA MADANIGA

Adiga iyo degmada/dugsiga waxaad buuxin kartaan dacwo waxqabad maxkamadeed markii aad labadiina isla ogolaan weydaan qaraarkii maxkamadeed iyo go'aanadii uu sameeyey sarkaalkii dib u hubinta dhageysiga (dacwada). Dacwada waxa laga yaabaa in la keeno maxkamadda Gobolka ama Federaalka. Falka madaniga, maxkamadda waxay (weydiisan):

1. In ay hesho diiwaanada oo maamulka uu sii waday;
2. Sida ku saleysan go'aankeeda ah kan ugu tiro badan cadeymaha/ ugu qaalibsan (preponderance); iyo
3. Dhageysiga marqaatiyo dheeeri ah sida dhinac ka mid ah dhinacyada is haya uu codsadey.

Maxkamaddu waxey kaloo sii dhegeysan kartaa caddeyn dheeraad haddey sidaa ku codsadaan qeybaha dacwadda.

## MEELEYNTA,WAQTIGUU DHAGEYSIGU SOCDO AMA DACWO QAADISTA MADANIGA

Waqtiga dhageysiga (dacwada) ama sharciga maxkamada uu socdo, haddeydaan adiga iyo degmadu ka heshiin, cunugaagu wuxuu joogayaa meesha uu haatan joogo oo waxbarashada loogu meeleeyey. Tani waxaa caadi ahaan loo yaqaanna nidaamka ah "meeshuu (meeshay) joogto ha lagu hayo".

Nidaamaka ah "meeshuu (meeshay) joogto ha lagu hayo" labaadaan ayaa ka reebaan:

1. Ardada laga soo waday meesha ay waxbarashadooda ka wateen lana geeney meeleyn waxbaraso kumeelgaar sababo la xariira dembiyada isticmaalka mandooriye ama hub, "meeshuu (meeshay) joogto ha lagu hayo" waxey ahaaneysa meeleeyn ka duwan meeleynta waxbarasho, anna ahayn meeleynta waxbarasho ee waqtigaan; iyo
2. Kaddib markuu dhaco dib u dhegeysi heer goboleed ah srkaalka dhegeysigana go'aankiisa shaaca laga qaado kaas oo ku raacsan re'yiga waalidka in beddelidda meeleynta ay tahay mid habbon, go'aanka sarkaalka dib u gheysiga wuxuu ahaanaya "meeshuu (meeshay) joogto ha lagu hayo" inta uu dhici doono codsiyada rafcaanka xiga.

## DHAGEYSI DEGDEG AH

Dhageysiga (dacwadda) waa in la dedejiyaa xaaladaha awgood:

1. Goor walba oo aad codsatid dhageysi qilaafsan go'aanka degmada/dugsiga in cunugaaga aqlaaqdiisa aysan ku lug leheyn curyaanima(diisa/deeda);
2. Mar walba oo aad codsatid dhageysi qilaafsan 45 cisho oo ku meel gaar ah oo loogu badelay meeleynta waxbarasho oo ay amreen shaqaalaha dugsiga; am
3. Markay degmadu/dugsigu codsado dhegeysi degdeg ah oo aasaasid u ah iney cunugaaga Qatar u thay inuu sii joogo meesha u hadda lagu meeleyey.

Meeleynta ka socota Sarkaalka Dhageysiga
Sarlkaalka dhageysiga wuxuu go'aan ka gaari doona in cunugaaga lagu meeleyo meel kumeelgaar ah ee waxbarasho leh ilaa 45 cisho ee taariqda kalendarka:

1. Marka ay degmadu/dugsigu la yimaado caddeyn ah inuu cunugaaga uu isaga/ayada is dhaawici karo ama dad kale dhaawaco haddii laguu sii hayo meeleynta hadda lagu hayo; iyo
2. Marka ay degmadu ay si macquulsan ku muujisay in la yareeyo qatarta ka imaan karta meesha hadda lagu meeleyey.

## DOORASHADA MEELEYNTA WAXBARASHADA KUMEELGAARKA AH

Degmadu/dugsigu waxey illaa 45 cisho ee taariiqda kalendarka ku beddeli karaan meeleynta waxbarashada cunugaaga, haddii aad;

1. Hub ku hasto dugsiga ama inta uu dugsiga socdo; ama
2. Uu si ulakac ah ku sito ama isticmaalo maandooriya la mamnuucay, ama lagu qabto iibinta ama xayeysiinta iibinta maandooriya inta uu dugsiga ama inta uu dugsiga socdo.

Haddii kooxda IEP/IIIP/IFSP go'aan ka gaarto meesha ay noqoneyso meeleynta waxbarashada kumeelgaarka ah. Inkaastoo tani tahay isbeddel kumeelgaar ah, waa iney cunugaaga fursad u siisa in:

1. Horumar ka sii gaaro culuunta guud, inkasto uu joogo meel duwan;
2. Inuu sii helo adeegyadaas iyo wax beddelka, xita ay ka mid noqdaan kuwa ku qoran cunugaaga IEP/IIIP/IFSP, oo ku caawineyso inuu cunugaaga kameelgaaro ujeeda(diisa/deeda); iyo
3. Iney kamid ahaadaan isbeddellada loo saameyey si looga hortago soonoqoshada dabciga.

Haddii cunugaaga lagu meeleyo waxbarasho kumeelgaar ah, waa in muddo 10 cisho lagu qabto kulan kooxda IEP/IIIP/IFSP oo ka dambeeya waqtiga go'aanka la gaaray. Kulankaan, kooxdu waa iney ka dooda dabciga iyo xiriika uu la leeyahay cunugaaga itaaldarridiisa, dib loo qiimeyo wargelinta ku saabsan dabciga, iyo in go'aan la garo tillaabada ku habboon oo la qaadayo qorshaha IEP/IIIP/IFSP ee cunugaaga.

## LACAGTA QAREENKA

Haddaad dacwadda dhegeysiga ku guuleysatid waxaa dib laguugu soo celin karaa lacagta kaaga baxday qareenka. Codsi lagu raadinayo lacagta waa in loo diro maxkamadda dhegeysigaa ka dambeysay. Garsoore ayaa go'aan ka gaaraya inta uu suuqa ka joogo lacagta uu ku baxeysa qareenka. Maxkamaddu waxaa laga yaaba ineysan hoos u dhigin lacagta qareenka haddey dhacdo inaad adigu si aan macquul ahayn aad dib u dhigtay taariqda heshiiska ama go'anka kiiska.

## KU MEELEYNTA DUGSIYO MADAXBANAAN

Waxey u badantahay in laguu soo celiyo lacagta wxbarashada haddi lagu meeleyo dugsi madaxbannaan haddi aad degmada u sheegtid inaad damacsantahay inaad cunugaaga ku soo qortid dugsiyo madaxbannaan qarashkiisana ay degmadu kaa bixineyso. Tani waa iney ka dhacdaa kulanka ugu dambeeyey oo ay qabteen kooxda IEP/IIIP/IFSP kana horreysa inta aan cunugaaga laga wareejin dusiyada guud ama aad qoraal ogeysiis ah ku soo ogeysiisid degmada 10 cisho ee maalmaha shaqada oo ka horreya inta aan cunugaaaga laga wareejin dugsiyada guud. Ogeysiiskaagu waa inuu si cad u sheega sabata aad u qilaafsantahay go'aanka degmada ee ku saabsan IEP/IIIP/IFSP ama meeleynta. Hadduu sarkaalka dhegeysiga ama maxkamaddu baritaan ku soo ogaadaan iney degmadu ama aysan siinin ama canuugagaa siin karin waxbarasho ku habboon ayna ku habboontahay in meeleyn madaxbanaan, lacagta kaaga baxday meeleynta madaxa bannaan ayaad xaq u yeelan kartaa in laguu soo celiyo.

Haddaad dugsiga u sheegi weydo inuu muraadkaaga yahay inaad cunuugaaga ku soo qoreysid dugsi madax bannaan uu lagacteedana degmadu kaa bixineyso, haddaadan cunugaaga u soo diyaarin qiimeyn, ama aad sabab la'aan wxey markaasi surtogal ka dhigi doontaa in la yareeyo ama la diidaba in laguu soo celiyo lacagta meeleynta madaxa bannaan. Haddey degmadu ka hortagtay inaad adigu soo dirtid ogeysiiskaan ama aadan adigu awood u leheyn inaad Ingiriisi wax ku qori kortid, sarkaalka dhegeysigu markasii kaama u dhimayo lacagta laguu soo celinayo.